

Suaalo iyo jawaabo Cutubka 2aad:

S1:sharax astaamaha nololeyda?

Jwb1:1-Nololeyda waa ay tarantaa,weyna kobacdaa.

2-Nololeyda waxey isdhaafsadaan ogsijiin iyo kaarboon labo oksayd

3-Nololeyda waxa ay meteleysaa qeybta nool ee deegaanka.

S2:Qeex carrada?

Jwb2:carro waa dhagaxa burburay kaas oo ay ku dhacday isbeddello kiimiko ah,ayna ku milmeen waxyaabo orgaanik ah kuna haboon in ay dhirtu ka dul baxdo.

S3:Wax ka qor waxtarka ay carradu u leedahay noolaha?

JWB3:carradu wa qeyraad dabiici ah oo aad muhiim u ah kuna dahaaran meelo badan oo dhulka oogadiisa ah,nolosha dhulka dushiisa ah waxey ku tiirsantahay carrada.waana isha tooska ah ee cunnada ama mud aan toos aheyn.

S4:Tilmaan waxa ay ka koobantahay carradu?

JWB4:1:walxo macdaneed .2:huyuumas 3:biyo 4:Hawo

S5:SHeeg waxyaabaha ka qeybqaata sameysanka carrada?

Jwb5: 1:Carro guurka 2:DHagax burbur 3:Tuulimaad

S6:SHeeg noocyada dhirta dabiiciga?

Jwb6:1:keymaha 2:Harama 3:Caws

S7:Tilmaan waxyaabaha saameynta ku leh koritaanka dhirta dabiiciga ah?

Jwb7:1:carrada 2:kala sarreynta dhulka 3: heerkulka iyo iftiinka 4: xaddiga roobka

S8:Waxka qor waxtarka dhirta dabiiciga ah?

Jwb8: 1: Waxa ay ilaalisaa qoyaanka carrada 2:waxa ay ka qeybqaadataa isku dheelitirka deegaanka. 3:Waxa ay ilaalisaa oo ay neecow siisaa jawiga 4:waxa ay yareysaa xaalufka ama in uu dhulku lama degaan noqdo.

S9:faalanqee dhibaatooyinka heysta dhirta dabiiciga ah?

Jwb: 1:gubashada keymaha 2:cudurada dhirta ku dhaca iyo abaaraha.3:ballaarinta dhulbeereedka iyo magaaloooyinka.

S10:Muuji kaalinta aadanuhu ku leeyahay aduunweynaha iyo saameyntiisa deegaanka?

JWB10:Aadanaha wuxuu Eebbe u sanduleeyey dhammaan waxa dhulka oogadiisa saaran,wuxuuna saameyn ku leeyahay deegaanka sida:hagaajinta dhul-beereedka,dhismooyinka guryaha,waddo dhisidda,macdan qididda IWM.

S11:Qeex noocyada xayawaanada?

JWB11:Noocyada xayawaanada waxa loo qeybiyaa ilaa iyo 5 qeybood:1-shimbiraha 2-daaq cune 3:xayawaanada ugaarsada 4:cayayaan 5-noolayaasha il ma aragtada ah

S12:Tilmaan waxyaabaha joqraafiga ah ee saameeya filiqsanaanta xayawaanada dhulka dushiisa?

JWB12:1-Dhirta dabiiciga ah 2-cimilada 3-kala sarreynta dhulka

S13:Qeex waxa loola jeedo nololeey?

JWB13:Waa dhammaan nololeyda laga helo oogada sare ee dhulka waxana ka mid ah(dhirta,xayawaanada,iyo aadanaha)

S14:Tilmaan waxa ay ka koobantahay gibilka nololeyda?

JWB14:carrada,dhirta,xayawaanka iyo Aadanaha.

S15:Sheeg noocyada carrada?

JWB15:1-carro madow 2-carro guduud 3-carrada hurdiga.

S16:caddee gobolada dabiiciga ah ee dunida?

JWB16:1- gobolada kulaaleyda ah 2- gobolada diirimaad dhex dhexaadka ah
3- gobolada qaboobaha dhexdhexaadka ah 4-gobolada qaboobaha cirifyada
5-gobolada buuralleyda

S17:Ka hadal nolosha dhirta iyo xayawaanada soomaaliya?

Jwb17:dhirtu waxey ku baxeysaa qaab teel teel ah meelaha roobku ku yaryahay
taas bedelkeeda waxey u baxeysaa si cufan(baahsan)meelaha roobku
badanyahay.xayaanada soomaaliya waxaa lagu tiriyaa waxsoosaarkooda
waxyaabaha ugu muhiimsan ee ay dhoofiyaandadka soomaaliyeed waana 80%
wax dhoofinta guud ee soomaaliya.waxaana saameeya sanadaha abaaraha iyo
roob yaraanta

QEYBTA LABAAD:DOORO JWBTA SAXDA AH:

1:Noocyada carrada tan ugu bacrimisan waa:

B:Carrada cowlan T: Carrada guduudan (J)CARRADA MADOW X:carrada
ramaadiga

S2:waxa lagu magacaabaa cawska meelaha dhexdhexaadka ah:

B:kirisesamum T:safaana (j):istibsi x:tundura

S3:gobolka kulaaleyda wuxuu ku fidsanyhy inta u dhexeysa:

1. B:15Degree waqooyiga kulaaha koonfureed iyo koonfurtiisaba
(T):5degree.23.5 degree waqooyiga dhulbaraha iyo koonfurtiisaba
2. J:4degree-5degree koonfurta kulaalaha koonfureed.
X:5degree-23.5degree waqooyiga dhulbaraha

S4:Roobabka gobolka badhaalaha waxa ay da,aan sanadkoo dhan iyagoo
kordhaya xilliyada:

B:Gu,ga iyo jiilaalka T:deyrta iyo xagaaga (J):Gu,ga iyo deyrta X:jiilaalka iyo xagaaga

QEYBTA 3AAD:

S1:Sababee waxyaabaha soo socda:

B:Midabka guduudan ee ku faafsan carrada guduudan dhexdeeda

JwbB:jiritaanka burburka birta (iron oxides)

T:waxaa lagu tiriyaa dhirta qodob muhiim u ah jiritaanka Aadanaha iyo xayawaanka

JwbT:waxey soo saartaa ogsijiinta lagama maarmaanka u ah guud ahaan noolaha

J-Yaraanta dhulka keymaha ah ee dhulka soomaaliya iyadoo ay jirto in ay dhacdo qeyb ka mid ah gobolka badhaalaha

Jwbj: jarista dhirta oo aad u badan soomaaliya

QETBTA 4AAD:

Qor warbixin ku saabsan waxyaabaha soo socda:

S1:caqabadaha heysta dhirta iyo xayawaanada soomaaliya

Jwb1:mawjadaha iyo abaaraha dalka ka dhaca dhawrkii sano mar, taasna wa waxa ugu halista badan ee soo foodsaara dhirta iyo xayawaanada soomaaliya.

S2:caqabadaha heysta dhirta dabiiciga ah ee soomaaliya.

Jwb2:jarista dhirta iyadoo la gubayo si looga dhigto dhuxul iyo abaaraha dhawrkii sano mar ku dhufata soomaaliya.

Waxaa idiin soo diyaariyey: Al Ustaad Axmed c/dullaahi cali